



# BALLANTAADA UURKA EE UGU HORRAYSA ISBITAALKA DUMARKA (The Women's)

Hubi inaad ballan la samaysato adeegyada laga yaabo inaad u baahan tahay KA-HOR ballantaada.

Waxaad ka samaysan kartaa ballan adeegyada soo socda:

- ku soo wareega Isbitaalka
- kulanka barashada ilma dhalida
- ballan taada ilma dhalida(s)
- turjubaan ka.

Dhamaan faahfaahinta adeegyada Isbitaalka Dumarka (The Women's) booqo websaytkayaga: [www.thewomens.org.au/patients-visitors](http://www.thewomens.org.au/patients-visitors)

## Dhakhtarka qoyska

Muhiim ayay kuu tahay adiga, ilmahaaga iyo qoyskaaga in aad leedihiin (GP) Dhakhtar Guud (Dakhtar Guud ama dhakhtarka qoyska) oo aad taqaan aadna aamintay. Dhakhtarka Guud (GP) wuxuu bixin karaa daryeel joogto ah uurkaaga ka dib iyo weliba daryeelka caafimaadka guud oo adiga iyo qoyskaaga.

## Arag dhakhtarkaaga guud (GP) baaritaankaaga hore ee uurka.

Waxaad arki kartaa Dhakhtarkaaga Guud oo baaritaankaaga uurka ee hore ee baaritaanada iyo booqashooyinka joogtada ah. Dhakhtarkaagu wuxuu awoodaa:

- in uu ta'kiidiyo uur kaaga laga qaadayo kaadida ama baaritaanka dhiigga
- wuxuu kaala hadli doonaa wax kasta oo ku saabsan welwelka laga yaaba inaad qabto oo ku saabsan uurkaaga ama caafimaadka guud
- kala hadal oo horay organise u qaban-qaabi baaritaanada iyo ultrasounds-ka (Altarasoundi)
- kala hadal wixii ku saabsan cuntada iyo jimicsiga iyo talada kaleeto ee hanaan nololeedka
- ka talaal naftaada iyo xaaskaaga hargabka mudada aad leedahay uurka
- ka talaal naftaada iyo lamaanahaaga kixdheerta laga bilaabo asbuuca 28aad

- waxay kaa caawimaysaa inaad joojiso aalkolada iyo isticmaalka daroogada, haddii loo baahdo
- xaqiiji in daawa kasta oo aad qaadanayso ay amaan ku tahay uurka, kuwaas oo ay ku jiraan daawooyin kasta oo dabiici ah ama daawooyin nooc kale ah
- inay kaala hadlaan wixii la xiriira daryeelka uurkaaga taas oo ah daryeel wadaag ah oo ka dhexeeya bukaanka iyo Isbitaalka The Women.

Dhakhtarkaaga guud ayaa codsan kara baaritaanada soo socda:

- baaritaanka kaadida iyo dhiiga
- baaritaanka eegida ilma galeenka (Haddii mudadaadii la joogo, tan waxaa loo samayn karaa waqtiga uurka)
- baaritaanka hida raaca
- raajada loo yaqaan ultrasound (Altarasoundi).

La hadal dhakhtarkaaga wixii lacag ah oo la iska rabo.

## Baaritaanada Hidda Raaca

Iyada oo carruurta badankood ku dhashaan caafimaad qab, had iyo jeer waxaa jirta khatar ah dhibaato. Goa'aanka baaritaanku wuxuu ku xiran yahay adiga iyo lamaanahaaga.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan baaritaanka:

- La hadal dhakhtarkaaga wixii la xiriira baarista hidaha raaca
- Fiiri websaytkayaga si aad ku hesho macluumaad faahfaahsan: [www.thewomens.org.au](http://www.thewomens.org.au)
- La xiriir Adeegyada Talasiinta Hida-raaca Dumarka ee The Women's [www.vcgs.org.au/](http://www.vcgs.org.au/)

## Ultrasound (Altarasoundi)

Waxaan soo jeedinaynaa in dhamaan dumarku iska qaadaan Ultrasound inta u dhexaysa 19 iyo 22 asbuuc si ay u hubiyaan horumarka ilmahooda. Dhakhtarkaagu wuxuu u baahan doona inuu kaaga qaban qabanqaabiyo midaan bulshada dhexdeeda.

## Ballantaada ugu horraysa ee The Women's

Waxaan doonaynaa in aan kaaga qabanqaabino ballan Isbitaalka Women's inta u dhexaysa 16 iyo 18 asbuuc marka uurkaagu yahay.

Waxa lala imanayo:

- koobiyada dhamaan dhiiga, kaadida iyo natiijooyinka ultrasound-ga (kuwaas oo ay ku jiraan baaritaanada hidda raaca) oo uu qaaday Dhakhtarka Guud
- kaarka Caafimaadka iyo Kaarka Daryeelka Caafimadka (haddii aad haysato mid)
- warqada Ta'kiidinta ballaantaada
- faahfaahinta meesha lagala xiriirayo dhakhtarkaaga
- haddii aad dibada ka timid waxaad u baahan doontaa inaad keento faahfaahinta caymiskaaga caafimaadka gaarka ah iyo baasaboorkaaga.

## Meesha laga hello macluumaad intaas ka badan

### Xarunta Soo-dhowaynta ee Isbitaalka Women's

T: (03) 8345 3037 ama 1800 442 007  
(wacayaasha baadiyaha)

### Adeegyada luqada ee Isbitaalka The Women's

T: (03) 8345 3054 (Si aad u hesho Turjumaan)

Macluumaad intaas ka badan oo uurka iyo xaashiyaha xaqiiqada waxaa laga hellaa websaytka Isbitaalka The Women's:

www.thewomens.org.au